



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 16, 2021-ka

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Shuruudaha maaskaraha ee guud ahaab gobolka

Guddoomiyaha Gobolka ayaa dhawaan [ku dhawaaqday shuruudaha maaskaraha ee gudaha la joogo ee gobolka oo dhan](#). Si gacan looga geysto in laga joojiyo nooca Delta ee sida aadka ah la isku qaadsiiyo in uu sii faafo, maaskaruhu waa kuwo la iskaga baahan yahay guud ahaan gobolka marka la joogo dhammaan goobaha dadweynaha ee gudaha ku yaala, laga bilaabo Jimcaha, Ogoosto 13, 2021.

Waa muhiim in la xusuusnaado raacida xeerarka gobolka iyo degaanka. Waxaa kale oo ay muhiim u tahay in daryeel bixiyayaasha iyo maamulayaasha kiisku ay caawiyaan dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka si ay badbaado ugu sugnaadaan iyaga oo raacaya xeerarkani. Xubnaha ka tirsan qoyska, asxaabta, iyo shaqaalaha taageerada ayaa gacan ka geysan kara wargelinta iyo waxbarida dadka qaba I/DD kaasi oo ku saabsan sababta maaskaraha iyo waxyaabaha wajiga la gashado ay muhiimka u yihiin, balse laguma qasbi karo shakhsi in uu xirto mid. Haddii qof qaba I/DD uusan awoodin in uu xirto maaskaro isaga oo joogo meel dadweyne ee gudaha ku yaala, fadlan taageer qofkaasi in uu siyaabo kale badbaado ugu sugnaado.

Fadlan tixrac Tilmaamaha Shaqaalaha ee loogu talagalay [maamulka kiiska](#), [ruqsad bixinta](#), [guryaha la degan yahay 24-saacadood](#), [shaqada/taageerada hawlaha maalintii](#), [nolosha la taageero](#) iyo [hay'adda adeega guriga-dhexdiisa](#).

Waad ku mahadsan tahay sii wadidda taageerada caafimaadka iyo badbaadada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).